



OTTAWA-CARLETON
DISTRICT SCHOOL BOARD

Waxbarashada Ilmahaaga — **Ka Qaybqaado!** *Sida looga qaybgalo!*



Sideen uga caawin karaa ilmahayga inuu ku guuleysto dugsiga?

Waxaad ku caawin kartaa ilmahaaga inuu hantiyo kartiida/eeda buuxda waxabarashada dugsiga adiga oo si firfircoon uga qaybqaata waxbarashada ilmahaaga — markay tahay guriga, dugsiga, iyo bulshada. Taas micnaheedu waa adiga weyddiisa su'aalo ku saabsan waxa u ilmahaagu baranayo, iyo adiga oo la hadla macalimiinta ilmahaaga, iyo adiga oo tusa ilmahaaga sida loogu isticmaalo waxbarashadooda nolol maalmeedka.

Fayoqabka ayaa muhiim u ah guusha ardayga. Waalid ahaan, daryeelka iyo dhaqaalaynta aad siiso ilmaha ayaa ka caawisa inay ku yimaaddiin dugsiga, caafimaad-qab, farxad iyo iyaga oo diyaar u ah inay wax bartaan.

Waa maxay faa'idooyinka door ka qaadashada waxbarashada ilmahayga?

Adigu waxaad shuraako muhiim ah ku tahay waxbarashada ilmahaaga, iyaga oo ay garab siinayaan macalimiinta, dugsi maamulayaasha, shaqaalaha taageerada, maamulayaasha, iyo ammaano hayeyaasha. Adiga oo arrimaha ka qaybqaata, ayaad dhiirrigalinaysaa caadooyinka waxbarashada wanaagsan oo aad ka taageereysaa ilmahaagu inuu fursadahiisa/heeda mustaqbalka kala doortaan. Daraasado ayaa muujinaya in marka ay waalidku ka qaybqaataan waxbarashada, ay ardaydu si ka fiican wax u bartaan.

Ma jiraan wax aan ku qaban karo guriga?

Haa, waxbarashadu waxay ka bilaabantaa guriga. U yeelasho caadaysi waxqabadka, iyo hubinta seexasho ku filan, iyo ka caawinta carruurta inay yeeshaan xakamaynta shucuurta — kuwaas ayaa ah seeska dhismaha ku guuleysiga dugsiga iyo noloshaba. Waxaad ku taageeri kartaa waxbarashada cimriga oo idil ilmahaaga adiga oo u mara wax-akhriska. Wax akhriska, luqad kasta iyo da' kasta ha noqotee, waa mid ka mid ah siyaabaha ugu wanaagsan ee loo xaqiijiyayo guusha ardayga ee dugsiga.



Waxaad sidoo kale ka caawin karaa adiga oo kala hadla ilmaha wax ku saabsan maalintiisa/ teeda, caawinta si ay u abuuraan fikraadahooda, iyo hubinta in ilmahaagu diyaar u yahay dugsiga maalin kasta. Waxbarashada ka dhig madadaalo — ciyaaraaha looxa (board games) la ciyaar, taga maktabadda dadweynaha, ka wada hadla dhacdooyinka haatan taagan!

Maxaa ka mid ah caqabadaha laga yabaa kahor iman kara inay waalidiintu qayb qaataan arrimaha?

Waalidiin badan ayay ka horyimaaddiin dhibaatooyin la mid ah kuwa adiga ku hortaagan. Xilka shaqada iyo qoyska ayaa inta badan ayay is-qilaafaan saacadaha dugsiga. Luqadda, gaadiidka, dhaqanka, iyo arrimaha lacageed ayaa mararka qaarkood kaa horistaagi kara inaad arrimaha ka qaybgasho. Waxaan diyaar u nahay inaan ku caawino! Maamulaha dugsiga iyo macallimiinta ilmahaaga ayaa raba inay maqlaan fikradahaaga ku saabsan sida ay kaaga caawin karaan inaad si firfircooni dheeraad ah uga qaybqaadato waxbarashada ilmahaaga. Tallaabada ugu horraysaa ayaa ah la xiriirka dugsiga ilmahaaga iyo adiga oo weyddiista sida aad uga qaybqaadan karto.

Sideen uga qaybqaadan karaa anigu waxbarashada ilmahaaga?

Haddii aad haysato shan daqiiqo, ama dhowr saacadood, ama hal habeen bishiiba ama in ka badan, waxaad ku samayn kartaa isbeddel waxbarashada ilmahaaga. Buugyarahan ayaa ku siinaya fikradaha qaarkood ee kaa caawinay ka qaybqaadashada arrimaha. Waxaan kugu dhiirri-galinaynaa inaad la hadasho maamulaha dugsigaaga, guddigaaga dugsi, iyo waalidiinta kaleba si aad ula wadaagto fikradahaaga. Soo ogow waxa ka dhacaya dugsigaaga si aad uga qaybgasho arrimaha.

Xaggeen macluumaad dheeraad ah ka heli karaa?

Dugsigaaga ayaa ah meesha ugu fiican ee laga helo macluumaadka. Waxa kale oo aad kala xiriiri kartaa OCDSB taleefanka 613-721-1820 ama ku booqo internetka halkan www.ocdsb.ca.

Haddaad furtaba buugyarahan waxay ka dhigan tahay horayba waad uga ka qaybqaadanaysay waxbarashada ilmahaaga.





Waxbarashada ka dhig madadaalo! Isticmaalka buugaagta midabaynta, ciyaaraha iyo jilitaanka ayaa ka mid ah tusaalooyin qaarkood!

Fursadaha Guriga Ka Jira

Haddii aad haysato . . .

Dhowr
dajiqo



- Ka caawi ilmahaaga inuu yeesho habdhaqan caadeysi leh oo uu ugu diyaar garoobo dugsiga maalin walba.
- Hubso in ilmahaagu maalinta ku bilaabo quraac.
- Weyddii ilmahaagu wixii ka dhacay maanta fasalka iyo garoonka carruurta ku ciyaarto.
- Kula xiriir maamulaha dugsigaaga iyo macallimiinta ilmahaaga iimayl, taleefan, ama qof ahaanba.
- Booqo degelka internetka ee dugsigaaga iyo degelka guddiga dugsiga si aad ula socoto waxqabayada dhawaanta ah iyo iyo kuwa soo socdaba.
- Akhriso waraaq-wareedyada dugsigaaaga, guddiga dugsiga, iyo fasalka — ka eeg boorsada ilmahaaga nuqul daabacan ama ka eeg waraaq-wareedka barta internetka.

Dhowr
saacadood



- Ugu akhri ilmahaaga luqad kasta ha noqotee si aad uga caawiso inuu waxabarto.
- Ka caawi ilmahaaga hawsha dugis-guri adiga oo meel deggen u sameeya, iyo adiga oo uga jawaaba su'aalaha guud, iyo adiga oo ilmahaaga weydiya inuu sharaxo waxa isagu ama iyadu ay soo barteen.
- Ilmahaaga kala hadal arrimaha hataan socda oo isaga ama iyada ku dhiirrigali inay akhristaan wargaysyada iyo majaladaha maxalliga ah.
- Soo ogow haddii aad u noqon karto tabaruce ama iskuduwe tabaruce fasalka ilmahaaga ama guddiga dugsigaaga.

Maalin



- Nadiifi kabadhada oo ugu deeq buugaag ama alaabta carruurto ku ciyaarto (toys) dugsiga (ka hubso maamulayaasha iyo macallimiinta dugsiga liiska waxyaabaha loo baahan yahay).
- Wada booqda ilmahaaga matxaf ama ka qaybgala dhacdo gaar ah oo magaalada ka jirta si uu u barto arrimaha ku saabsan mawduuc uu isagu ama iyadu ay ku dhiganayaan dugsiga.
- Dhiirigali waxbarashada firfircoon iyada oo loo maro ciyaaraha dibadda, ciyaaraha looxa, iyo gacan ka-geysiga hawlaha guriga.
- Bar ilmahaaga inuu u isticmaalo internetka si ammaan ah oo waxtar leh.

Hal jeer bishii



- Soo ogow haddii u dugsiga, ama guddiga dugsiga iyo/ama macallinka fasalka ilmahaagu ay leeyihiin kalandar bille dhacdooyin oo ku dheji albaabka qaboojiyahaaga si uu qof kastaa u akhristo.
- Akhristo qodobbada/cusboonaysiinta kulanka guddiga dugsiga si aad u ogaataan dhacdooyinka, dadaallada iyo/ama arrimaha haatan jira.

Dhowr jeer bishiiba



- Soo ogow haddii aad u tabaruci karto inaad diyaariso qalabbada fasalka ama waxyaabaha kale ee loogu talagalay dhacdooyinka gaarka ah ee dugsiga.
- U fidi caawimo u turjumaad luqaddaada hore ah dukumentiyada, sida mashruucyada dugsiga iyo wada xiriirka guddiga dugsiga, in loo qaybiyo waalidiinta ka tirsan beeshaada dhaqameed.
- U fidi caawimo aad kala shaqayso dugsigaaga iyo guddiga dugsigaaga inay dhammaystiraan codsiyada deeqda, sida Deeqaha Gacan u Fidinta Waalidka Wasaaradda ee loogu talagalay Dugsiyada (Parents Reaching Out Grants for Schools) — www.edu.gov.on.ca.

Xilli



- Taageer xiisaha uu u qabo ilmahaagu waxqabadyada ah kaddib dugsiga ama dugsiga waxa dibadda ka ah, sida muusikada, isboortiga, ama barnaamijyo xiisaha gaarka leh.
- Tababar ama u tabaruc inaad ka caawiso koox dugsi, ciyaar ama qorshe u ilmahaagu danaynayo.

Ku abuur jacaylka waxbarashada — ku dhiirigeli ilmahaaga inuu sahamiyo fikradaha.



U tabaruc dugsiga si aad uga caawiso dhacdo gaar ah ama xirfad la wadaag!

Fursadaha ka jira dugsiga ilmahaaga

Haddii aad haysato . . .

Dhowr daqiiqo



- Ka diyaarso ballan macallinka ilmahaaga si aad u booqato fasalka oo aad u ogaato guulaha iyo caqabadaha ilmahaaga.
- Salaan maamulaha iyo shaqaalaha xafiiska dugsiga ilmahaaga.
- La xiriir guddoomiyaha guddiga dugsiga si aad u ogaato sida aad uga qaybgali lahayd arrimaha.
- Akhiri boodhka wararka ee dugsigaaga.
- Soo ogow waxa kheyraad waalid ka jira dugsigaaga oo ka faa'iidayso iyaga.

Dhowr saacadood



- Ka qaybgal Habeenka La-Kulan-Macallinka (Meet-the-Teacher Night) ee dugsigaaga oo wakhti u qaado inaad booqato macallimiinta iyo xubnaha ka tirsan maamulka dugsiga.
- Ka qaybgal Wareysiyada Waalid-macallin (Parent-Teacher Interviews) si aad uga wada hadashaan horumarka ilmahaaga iyo shaqada koorso ee soo socda.
- Ka qaybgal shirarka guud ee dugsiga, shirarka guddiga dugsiga, dhacdooyinka gaarka ah — taageeradaada yaa loo baahan yahay oo la soo dhawaynayaa.
- Baro waalidiinta kale ee dugsiga — isku xirnaada.

Maalin



- Soo ogow sida aad ugu tabaruci karto dugsiga gudahiiisa — u akhrinta ardayda, ka qayb safarrada gaaban, dhacdooyinka gaarka ah, xusidda ciidaha, ka caawinta farshaxanka, hagaajinta maktabadda, ama wax kasta oo hawlo maamuleed ah.
- Soo ogow haddii aad u tabaruci karto inaad noqoto qudbadeeye marti ah ama u-meeriye/hage — caawimadaada waa la qaddarinayaa.

Hal jeer bishii



- Ka qaybgal kulanka guddi dugsi ee dugsigaaga (badanaa hal fiid bishiiba).
- U tabaruc inaad xubin ka noqoto guddiga dugsiga ama aad ka caawiso mashruuc gaar ah, sida qorshaynta dhacdo gaar ah, iyo waxyaabo kale oo badan — hibadaada waa loo baahan yahay.

Dhowr jeer bishiiba



- Ka qaybgal dhacdooyinka gaarka ah ee dugsiga, aqoon-isweydaarsiga waalid, iyo hawlaha kale ee dugsiga ilmahaaga — ka qaybgalkaaga ayaa waxtar leh.
- U tabaruc inaad qabanqaabiso dhacdo dugsi bulsho ama qaaraan.
- U fidi caawimo u turjumaad kulanka guddiga dugsiga ah si aad ugu dhiirrigaliso waalidiinta ka tirsan beeshaada dhaqameed inay ka qaybgalaan.
- Soo ogow haddii aad kala shaqayn karto dugsigaaga iyo guddiga dugsiga si ay u diyaariyaan buug-gacmeedkan soo-dhawaynta loogu talagalay qoysaska ku cusub dugsiga.
- Gacan caawimo ugu fidi cusboonaysiinta barta internetka guddiga dugsiga.

Xilli



- Soo ogow inaad u tabaruci karto tabbbaritaan koox ama naadi ka jira dugsigaaga.
- Soo ogow haddii aad tabaruci karto inaad dhaqangalsio naadi saacadda qadada ah si aad u barto ama aad ula wadaagto xirfad gaar ah ardayda.

Soo ogow waxa fursado tabaruc laga heli karo dugsiga. Garo midka (kuwa) adiga sida ugu fiican kuugu habboon xirfadahaaga iyo jadwalkaaga.



Dhexgal xubnaha beesha marka la joogo midkood siddeedda Xarumaha Waalidnimada iyo Aqoonta Akhriska iyo qoraalka Qoyska ah (Parenting and Family Literacy Centres) ka tirsan OCDSB!

Fursadaha Ka Jira Beeshaada

Haddii aad haysato . . .

Dhowr
daqiiqo



- Ula lugee ilmahaaga xaafadda markuu tagayo dugsiga.
- Haddii la heli karo, booqo barta internetka ururka xaafaddaada.
- Soo ogow waxa ka dhacaya xaafaddaada — akhriso wargaysyada beeshaada.

Dhowr
saacodood



- Soo ogow haddii aad u tabaruci karto inaad u qaybiso waraaqo-wareedyada iyo waraaqaha xayesiiska dugsiga xaafaddaada dugsiga.
- U tabaruc inaad la xiriirto meheradaha ama ururrada agagaarka ku yaal si ay u taageeraan waxqabayada dugsiga ilmahaaga ama diyarinta qudbadeeyeyaal marti ah.
- Booqo maktabadda dadweynaha agagaarkaaga ku taal.

Maalin



- Soo ogow haddii uu dugsigaagu martigaliyo marti-qaad Albaabadu U-Furan yihiin oo loogu talagalay ardayda iyo waalidiintaa dugsiyada degaanka si ay u soo booqdaan dugsiga oo "hawlaha ku jira" oo ka qaybgala ama gacan ugu fidi.
- Adiga oo la tashanaya dugsigaaga iyo guddiga dugsigaaga, u qaybi martiqaadyada loogu talagalay dhacdooyinka gaarka ah dugsiyada deegaanka iyo beeshaba.
- Xiriiryo ka samayso beeshaada — u hel fursado xubnaha beesha iyo dugsi ay ku wada shaqeeyaan.
- Ku dhiirrigali inuu ilmahaagu ka qaybgalo ama tabaruco dhacdooyinka beesha.

Hal jeer bishii



- Gacan ugu fidi inaad siiso gaadiid waalidiinta kale si ay u tagaan kulanka.
- Abaabul baabuur wada raac.
- Ka qaybgal shirka ururrada Dugsiyada Ottawa-Carleton Assembly of School Councils (OCASC) si aad u ogaato waxa dugsiyada kale ay ku kacayaan in loo kordhiyo mustaqabalaka ka qaybgalka waalidka — www.ocasc.ca.
- Gacan ugu fidi inaad qorto qoraallo ku saabsan waxqabadyada dugsiyada looguna talagaloo wargays maxalli ah.

Dhowr jeer bishiiba



- Ka qaybgal guddiga dugsiga iyo/ama shirarka golaha goobta ku taal OCDSB, 133 Greenbank Road.
- Kala hadal dugsigaaga iyo guddiga dugsiga arrimaha ku saabsan qabanqaabinta booqashooyinka dugsiga ee loogu talagalay waalidiinta ku cusub degaanka.
- Iyada oo aad kala tashato dugsigaaga iyo guddiga dugsiga, gacan ugu fidi dhammaystirka codsiyada deeqaha loogu talagalay mashruucyada cagaarinta dugsi, sida Deeqaha Geed Beerida Magaalada Ottawa — www.ottawa.ca.
- La shaqee urur beeled si aad u martisoorto dhacdo gaar ah.

Xilli



- Tababbar koox ama naadi deegaanka ka tirsan.
- Ka qaybqaado 'cagaarinta' ardaaga dugsiga, beeridda geedaha, ka shaqaynta beerta yar, dayactirka qalab lagu ciyaaro iyo/ama garoonnada dibadda (iyada oo lagala kaashado Waaxda Dhsimayaasha Isticmaalka).

Ardaydu waa inay gutaan 40 saacadood oo u adeegid beesha ah. Ku dhiirrigali inay goor hore u bilaabaan oo iyagana gee beesha markaad tabarucayso !



Sida Loogala Hadlo Iilmahaaga Arrimaha Ku Saabsan Dugsiga

Ka hadalka dugsiga ayaa ah dariiq fudud oo loogu talagalay waalidiintu inay ka qaybqaataan waxbarashada ilmahooda. Waalidiin badan ayaa weyddiiya kaliya 'siduu ahaa dugsigu?' laakiin su'aashan guud ayaa ku adkaan karta carruurta qaarkood inay ka jawaabaan. Si looga caawiyoo carruurta inay kula wadaagaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan maalintoodii dugsi, waalidiinta ayay u suutoobaysaa:

- Inay wax ka ogaadaan arrimaha ku saabsan noloshu dugsiga ee ilmahooda. Kolba faahfaahinta dheeraadka ah ee aad ka ogaato arrimaha ku saabsan waayaha dugsiga ee ilmahaaga, oo ay ku jira dad iyo dhacdooyin gaar ah, ayay su'aalahaagu qiimo yeelan doonaan;
- Haddii aad booqto fasalka ilmahaaga, u fiirso waxyaabah cusub ee laga yaabo aad rabtid inaad kala hadasho iyaga hadhow;
- Macallimiintu waxay isticmaalaan su'aalo dhugasho leh si ay ula hadlaan ardayda. Taas ayaad adiguna ku tijaabin karta markaad guri la joogo. Su'aalaha dhugadku waxay yareyn kartaa jawaabaha "haa" ama "maya" oo furi karaan sheekeysiga aad la leedahay ilmahaaga;
- Carruurta qaarkood ayaa laga yaabaa inay dareemaan kalsooni dheeraad ah haddii aydaan weji-ka-weji iska hor soo jeedin, sida baabuurka oo kale. Qaabkaas, ilmahaagu ma dareemi doono in golaha la soo taagay; oo
- Horseed tusaale ah ugu noqo adiga oo u sheega ilmahaaga maalintaadu siday ahayd.

Tusaalooyin qaarkood esu'aalaha waxa ka mid ah:

- Sidee ayuu ahaa fasalka farshaxanku maanta?
- Iiwad sheekada ku saabsan...
- Muxuu ku dambeeyayaad tijaabadaadii saynisku?
- Maxaa qaybo ka mid ah maalintaada kuu fiicnaa, oo ka caawiyay inaad waxbarato ...?
- Wax buugaag cusub ah ma ku akhrisatay maktabadda maanta?
- Maxaa xiise kuu lahaa?
- Ayaad garab fadhiisatay basaka maanta?



Sida Loola Hadlo Macallinka Ilmahaaga

Wada dhaqanka wacan ee u dhexeeya waalidiinta iyo macalimiinta ayaa wax kordhin u leh jawiga waxbarasho qumman ee ardayda, markay tahay guriga iyo dugsigaba. Waxa gudbinta bayaanka ahee labadaba waalidiinta iyo macallimiinta ayaa h arrin muhiim u ah inuu shaqeeyo xiriirkaasi. Waalidiinta ayaa la samaysan kara xiriir qumman macallinka ilmahooda iyaga oo:

- Adiga oo ula dhaqama macallinka ilmahaaga si ixtiraam leh. U abuurka iskaashi xalliya mushkiladda, halkii isla markiiba lagala hor iman lahaa macallinka waxa khalddan ayaa u abuura is aammin wada dhaqanka;
- Soo ogow waqtiga ku habboon in lala hadalo macallinka. Goorta kuu adiga kuu habboon ayaa laga yaabaa inayna u habboonayn macallinka. Soo ogow haddii macallinka ilmahaagu jecel yahay ku wada xiriirka loo maro iimaylka, taleefanka, ama wada kulanka;
- Diyaarso liis su'aalo ah oo leh tusaalooyin u gaar ah oo markaa u diyaar ah sidii xal loogu heli lahaa ama loogu abuurri xeelado u gaar ah arrinta meesha taal; iyo
- Macallinka weyddii waxaad gacan ka geysan karto arrinta si aad u meek dhigto kaalintaa ad ka qaadanayso iskaashi u dhexeeya guriga iyo dugsigaba.

Su'aalo Namuunad ah

- Sideen uga caawin karaa ilmahaaga shaqada dugsigaba ee guriga? Maxaa kheyraad ah ee jira?
- Maxaan u baahanahay inaan ka ogaado arrimaha ku saabsan imtixaanka EQAO?
- Sideen uga caawiya ilmahaaga inuu xusho koorsooyinka?
- Sidee ayaan ilmahaaga uga caawin karaa wax ka qabashada handadaadda?
- Halkee ayaan wax dheeraad ah uga ogaan karaa arrimaha ku saabsan taageerooyinka waxbarashada gaarka ah?

Waalid ahaan, waxaad saamayn ku yeelan kartaa sida ilmahaagu wax u baranayo.

Adiga oo ka qaybqaata waxbarashada ilmahaaga, waxaad u dhisi doontaa wada dhaqano muhiim ah dadka iyo ilaha laga helo beeshaada. Waxa taas ka sii muhiimsan, adiga oo ku dhiirrigalin doonaa ilmahaaga si u wax u barto iyo inuu yeesho kalsoonida iyo is-qaddarinta uu isagu ama iyadu ugu baahan yihiin inay guulaystaan. Waxaa jira siyaabo badan oo aad uga qaybqaadan karto. Soo ogow siyaabaha adiga kuu habboon.



Buugyarahan ayay diyaarisay Golaha Degmo Dugsiyeedka Ottawa-Carleton Guddiga Qaybgalka Waalidka (Ottawa-Carleton District School Board Parent Involvement Committee) laguna soo saaray kharash laga helay Gobolka Ontario kana timid *Deeqda Gacan U Fidinta Waalidiinta (Parents Reaching Out [PRO] Grant)* Wasaaradda Waxbarashada. Buugyarahan waxaa lagu heli karaa Faransiis, Carabi, Mandarin, Urduu, Isbaanish, Faarsi, iyo Soomaali.

**Waxa daabacay Communications and Information Services oo ay iskaashanayaan
Guddiga Qaybgalka Waalidka — Juun 2014**



133 Greenbank Road • Ottawa, ON K2H 6L3 • Phone: 613-721-1820
Faakis: 613-820-6968 • Barta internetka: www.ocdsb.ca